Taageerida in 9-ka Sebtembar loo Magacaabo Maalinta Wacyigelinta HIV/AIDS-ka iyo Cagaarshowga ee Dadka Soogalootiga iyo Qaxootiga Afrikaanka ah

Anagoo ah ururada hoosta ku saxeexan, dhamaan waxa naga go'an in layareeyo kala duwanaanshiyaha caafimaad ee haysta dadka qaba HIV/AIDS iyo cagaarshowga B ee kasoo jeeda bulshooyinka cudduradaas ay aad u saameeyeen iyadoo la kordhinayo wacyigelinta, baarista, ka hortagga, helida daryeel caafimaad. Waxaan ku baaqaynaa in si rasmi ah loo magacaabo Maalinta wacyigelinta qaranka ee Soogalootiga iyo Qaxootiga Africaanka ah ee qaba HIV/AIDS & Cagaarshawga (NAIRHHA), kaas oo la xusi doono sanad walba Sebtembar 9 keeda, si loo ilaaliyo caafimaadka federaalka.

Tirada soogalootiga iyo qaxootiga Afrikaanka ah ku nool Mareykanka ayaa kordhay 500% intii u dhaxeysay 1980 iyo 2016. Bulshooyinkan waxaa la filayaa inay sii badan doonaan si saa'id ah - xogta tirakoobka Mareykanka ayaa shaacisay in tirada dadka soogalootiga Afrikaanka ah ay kordheen 71% intii u dhaxaysay 2001-2016. Heerarka xanuunka HIV-ga ayaa lix jeer ku badan dadka soogalootiga ee Afrikaanka ah marka loo eego dadka maraykanka guud ahaan.
Soogalootiga Afrikaanka ah ayaa sidoo kale wajahaya heerarka ugu sarreeya ee cagaarshowga B ee dalka maraykanka, oo ku dhawaad 10% bulshooyinkan waxay la nool yihiin cagaarshowga B. Maadama uu aad ugu badan yahay heerka fayraska cagaarshow B qaybo badan oo qaaradda Afrika, CDC(Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada) waxay ku talinaysaa in shakhsiyaadka ku dhashay Afrika, ama shakhsiyaadka ku dhashay Maraykanka ee leh ugu yaraan hal waalid oo ku dhashay Afrika, oo aan la tallaalin markii ay dhasheen, in mudnaanta ugu weyn la siiyaa oo laga baaro cagaarshow B.

Bulshooyinka Afrikaanka ee soogalootiga ah waxay la kulmaan caqabado waaweyn oo ay ka mid yihiin HIV-ga iyo baarista fayraska cagaarshowga, daryeelka, iyo daawayntisa: In kasta oo dadkan ay ku badan yahay xanuunadan, bulshooyinkani waxay leeyihiin heerar hoose
oo dhanka ogaanshaha cudurada iyo daryeelka. Caqabadaha ay dadkani waajahaan waxaa ka mid ah ceebayn, cabsi, faham iyo aqoon yari, caqabadaha luqadda, qiyamka soo jireenka ah iyo dhaqamadda bulshada, iyo haddidnaanta helitaanka adeegyada daryeelka caafimaadka.
Xaaladda socdaalka/sharciga dadlka ayaa sidoo kale lala xiriiriyaa in laga cabsado xarumaha caafimaadka, faham la'aanta dhaqanka ay ku dhex jiraan iyo aqoon la'aanta sida uu u shaqeeyo nidaamyada daryeelka caafimaadka, takoorka bulshada iyo dhaqaalaha, in ay ka cabsadaan in la musaafiriyo, iyo la'aanta caymiska caafimaadka, kuwaas oo dhamaantood caqabado waaweyn ku ah caafimaadka dadka soogalootiga Afrikaanka ah iyo qaxootiga ku nool Maraykanka. Waxa

kale oo jirta baahi loo qabo bixiyayaasha iyo adeegyada si ay u noqdaan kuwo habboon dhaqan ahaan iyo luqad ahaanba si ay si wanaagsan u daboolaan baahiyaha Afrikaanka soogalootiga ah, iyadoo la ilaalinayo Adeegyada Bulshada ee Dhaqanka iyo Luuqadda(CLAS) ee daryeelka caafimaadka iyo caafimaadka, kuwaas oo qeexaya in qaab-dhismeedka lagu bixiyo adeegyada ay yihiin kuwo ixtiraam leh oo u nugul luqadda iyo dhaqanka, iyadoo la tixgalinayo dookha, baahiyaha, dhaqanka, iyo diimaha
uu aaminsanyahay bukaanka.

HIV iyo cagaarshowga B iyo C waa xanuuno laga hortegi karo lana daweyn karo - haddii diirada la sooro, natiijooyinka caafimaadka ee bulshooyinka soogalootiga Afrikaan-ka ah waa la wanaajin karaa noloshoodana waa la badbaadin karaa. Maalinta NAIRHHA waa maalin loogu talagalay in lagu soo bandhigo dareenka maxaliga iyo ka qarankaba ee ku wajahan arrimaha caafimaadka HIV/AIDS-ka iyo fayraska cagaarshowga ee saamaynta ku leh soogalootiga Afrikaanka iyo qaxootiga ku nool dalka maraykanka. Iyadoo loo marayo hab dhawraya dhaqanka iyo luuqada dadkaas. Marka aan ka hadlayno arrimaha gaarka ah ee haysta soogalootiga Afrikaanka ee ku sugan maraykanka anagoo adeegsanayna waxbarasho, wacyigalin iyo adeegyo kale, Maalinta NAIRHHA waxay gacan weyn ka geysan doontaa xoojinta in bulshooyinku ay maamuli doonaan caafimaadkooda.

Ujeedooyinka maalinta NAIRHHA waxaa ka mid ah: (1) Wacyigelinta iyo cidhibtidhka ceebaha (2) Waxbarsho ku saabsan ka hortagga iyo daawayntaHIV, fayraska cagaarshowga iyo cudurada kale ee la xiriira; (3) In bulshada dib loogu soo celiyo xakamaynta iyada oo la dhiirigalinayo baadhitaanada iyo daaweynta, iyo sidoo kale tallaalka cagaarshowga B; iyo (4) U doodista siyaasadaha iyo dhaqamadda kor u qaada caafimaadka bulshooyinka ka soo jeeda Africa, iyo shakhsiyaadka soogalootiga ah. Hadda ma jirto Maalinta Wacyigelinta HIV/AIDS taas oo looga hadlayo arrimaha kala duwan ee saameeya heerarka sare ee HIV iyo fayraska cagaarshowga ee ku badan bulshooyinka qaxootiga Afrikaanka ah. Dadkan oo inta badan
la iska indhotiro ama si khaldan lagu sifeeyo inay "Madow" ama "Afrikaan Ameerikaan" yihiin marka la joogo barnaamijka sahminta HIV-ga, sababtoo ah nidaamyada kormeerka oo aan uriirin xogta qofka dalka uu kasoo jeedo.

Iyada oo tirada dadka muhaajiriinta Afrikaaka ah ee ku sugan maraykanka ay si xawli ah u kordhayso, waxaa muhiim ah in kor loo qaado wacyiga ku saaban khatarta fayraska cagaarshawga iyo HIV/AIDS ee bulshooyinkan iyo daryeelka caafimaadka iyo shaqaalaha caafimaadka ee u fidiya adeegyada caafidaadka cawaaqibta ka dhalan karta iyo fursadaha looga hortagi karo, sida loo ogaan karo, iyo sida la iskaga daweeyo.Madaama soogalootiga Afrikaanku ay noqonayaan dad muddo dheer dagnaan doona Maraykanka, waxaa muhiim in la badiyo baaritaanka, ka hortagga, iyo daaweynta cudurrada faafa iyo kuwa lala noolaado iyadoo hab dhaqanka iyo luuqadaba ku haboon la adeegsanayo. Awood dhisidda bulshada si kor loogu qaado aqoonta ku saabsan daaweynta iyo ka hortagga HIV iyo fayraska cagaarshowga waxa ay si weyn u taageeri doonta in hindisaha Maalinta NAIRHHA uu sii jiro. Bulshooyinku marka ay kordhiyaan awoodda ay kaga jawaabayaan "cudurrada aamusan" ee HIV iyo fayraska cagaarshowga, waxay heli doonaan ilo si ay u sii wadaan shaqadan. Markaan dad badan ku

dhiirigalino in ay is shaybaadhaan oo ay is daaweeyaan. Maalinta NAIRHHA waxay gacan ka gaysanaysaa in hoos loo dhigo cudurrada. In la yareero ugu dambayntiina meesha laga saaro ceebaha ku hareeraysan HIV/AIDS iyo fayraska cagaarshowga , maalinta NAIRHHA waxay sidaas ku fududaynaysaa dhismaha iyo xidhiidhka bulshada. In 9-ka Sebtembar loo magacaabo "Maalinta wacyigalinta HIV/AIDS iyo Cagaarshowga ee soogalootiga Afrikaanka iyo Qaxootiga (NAIRHHA)",
waxay baraarujinaysaa muhiimadda ay leedahay in diirada la saaro waxna lagu bixiyo la tacaalidda dhibaatooyinka HIV/AIDS iyo fayraska cagaarshowga ay ku hayaan bulshooyinka soogalootiga iyo muhaajiriinta Afrikaanka ee ku sugan maraykanka, waxayna dhiirigalinaysaa in gacan laga gaysto hoos u dhigada kiisaska fayraska cagaarshowga iyo xanuunada HIV-ga iyo Cagaarshowka B- io C- iyo dhimashada la xiriirta cudurka HIV iyada oo la badinayo baadhista, tallaalka, iyo helida daawaynta iyo daryeelka dadka soogalootiga ee Afrikaanka iyo bulshooyinka qaxootiyada ah.

Saxiixay

Isbahaysiga dhaqamada kala duwan ee AIDS-Ka